

Daryeelka Carruurta Ee Qoyska	Hagaha Kaqaybqaataha Kormeerka Firfircoon: Taageerista Carruurta Gaartay Da'da Dugsiga
Qaybtan labada saacadood ah waxay buuxinaysaa shuruuda tababarka Xeerka 2 ee tababarka kormeerka. La Cusboonaysiiyay 2/2024	2 Saacadood

Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha Ka Dhalanaya

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:

DHS.Child.Care@state.mn.us

Guudmarka Casharka

Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

Qaybta Nuxurka KCF: VII.B. Xaqiijinta Badbaadada

Aagga Maadada CDA: Qorshaynta deegaan waxbarasho oo badbaado ah, oo caafimaad qaba.

Ujeedooyinka Waxbarashada:

Ayada oo tababarka kaliya uusan xaqiijinayn ujeedooyinka waxbarashada, haddana waxaa loo qaabayn karaa in lagu gaaro yoolal gaar ah oo loogu tala galay arday walba. Haddii ardaydu noqdaan kuwo wadashaqayn iyo ka qaybqaadasho leh, waxay baran doonaan inay:

- Qeex heerarka ruqsad bixinta ee Xeerka 2 aad ee Minnesota Department of Human Services (MN DHS, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota) ee ku aadan kormeerka goobaha daryeelka carruurta ee qoyska.
- Aqoonsadaan dhibaatooyinka iyo xalalka kormeerka ee ay bixiyaasha daryeelka carruurta la kulmaan inta ay la shaqaynayaan carruurta gaartay da'da dugsiga.
- Hirgeliyaan siyaasado iyo dhaqamo taageeraya baahiyaha badbaadada iyo kormeerka ee carruurta gaartay da'da dugsiga.

Ujeedooyinka Waxbarashada waa in dib loogu eegaa bilowga kulan kasta oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

Guudmarka Casharka

Wakhtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbaridda
15 daqiiqo	Soo Dhawaynta/Hordhacyada	Dooda kooxda ballaaran Dooda kooxda yar Hal Abuurka kooxda ballaaran
25 daqiiqo	Qorshaynta hawlaha iyo hawl-maalmeedka loogu talagalay carruurta gaartay da'da dugsiga	Fikir curinta kooxda yar Dooda kooxda ballaaran Hawsha koox yar Milicsiga shakhsi ahaaneed
30 daqiiqo	Cilaaqaadka wanaagsan iyo dhiirigelinta masuuliyadda	Hal Abuurka kooxda ballaaran Lammaanin iyo wax wadaagis
20 daqiiqo	Xaqiijinta cilaaqaad habboon carruurta dhexdooda	Hawsha koox yar
20 daqiiqo	Carruurta gaartay da'da dugsiga iyo isticmaalka tignoolajiyadda	Lammaanin iyo wax wadaagis Shaqada gaarka ah
10 daqiiqo	Dib-u-eegista Ujeedooyinka/Soo Xirista	Milicsiga shakhsi ahaaneed
Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood		

Supervision Definitions

MN Rule 2 for Family Child Care	Best Practice: Caring for our Children
Minnesota DHS Rule 2 (9502.0315, subp. 29a) defines supervision as: "Supervision" means a caregiver being within sight or hearing of an infant, toddler, or preschooler at all times so that the caregiver is capable of intervening to protect the health and safety of the child. For the school age child, it means a caregiver being available for assistance and care so that the child's health and safety is protected."	Caring for our Children: National Performance and Safety Standards defines best practice: "Caregivers/teachers should provide active and positive supervision of infants, toddlers, preschoolers, and school-aged children by sight and hearing at all times, including when children are resting or sleeping, eating, being diapered, or using the bathroom (as age appropriate) and when children are outdoors.

Ilaha

Liinkiyada Shati-bixinta iyo Qawaaniinta

- [Xeer 2 ee MN ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)
- [Qawaaniinta Minnesota, Cutubka 142B – Xeerka Shati-siinta Adeegyada Aadanaha](#)[Qawaaniinta Minnesota, Cutubka 245 A – Xeerka Shati-siinta Adeegyada Aadanaha](#)
- [Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shatiga Leh – Macluumaadka iyo Foomamka](#)
 - [Siyaasadda Soo Sheegista Waajibka ah ee Si Xun Ula Dhaqanka Carruurta Yaryar](#)
 - [Xaashida Baaritaanka Taariikhda Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)

Ilaha Caafimaadka iyo Badbaadada


- [Buug-yaraha Buckle Up Kids](#)
- [Jooji Hadda!](#)
- [StopBullying.gov](#)
- [Wadajir Aynu Kula Dagaalano Xoog Sheegashada](#)
- [Xarunta Qaranka ee Carruurta Maqan iyo Carruurta Laga Faa'iidaystay](#)

Ilaha Xirfadeed

- [Xogta Xarunta Daryeelka Carruurta Loo Dhan Yahay](#)
 - [Muuqaalka Hordhaca ah ee CICC](#)
- [Caring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Qaranka, Tilmaamaha Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurta](#)
- [Xeerka Anshaxa ee National Association for the Education of Young Children \(NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar\) iyo Bayaanka Ballanqaadka](#)
 - [Bayaanka Mowqifka NAEYC ee Horumarinta Sinnaanta ee Waxbarashada Dhallaanka](#)


Hirgelinta istiraatiijiyadaha badbaadada iyo kormeerka ee carruurta gaartay da'da dugsiga.

Qor istiraatiijiyadaha aad hirgelin doonto ama aad la soo hari doonto. Dhammaadka tababarka, tilmaan saddex istiraatiijiyado oo aad si degdeg ah uga hirgelinayso barnaamijkaaga



Hirgelinta siyaasadaha isticmaalka aaladaha iyo intarneedka ee daryeelka carruurta ee qoyska.

Hoos ku qor siyaasadahaaga isticmaalka aaladaha iyo intarneedka:



Ka Jawaabista Habdhaqannada Xoog Sheegashada

Akhri dhacdooyinka oo dhan oo aqoonso qaybta xoog sheegashada (xadgudub hadal, bulsho, ama jireed, intarneed)	Waa maxay jawaabtaadu?
Toddobaadki la soo dhaafay, waxaad aragtay in Hannah ay ka codsatay inay la ciyaarto Carmen iyo Alicia dibedda garoonka ciyaaraha, laakiin waxay u sheegeen in aysan saaxiib la noqon karin. Markii ay Hannah ka tagtay, waxaad aragtay Carmen iyo Alicia oo hoos wax isaga sheegaya islana qoslayo.	
Rodney iyo James waxay ku ciyaarayaan bannaanka. Markii Rodney uu saarnaa wiifowga, James ayaa gadaashiisa soo istaagay wuxuuna aad u riixay Rodney ilaa uu ka dhacay wiifowga. Markii Rodney uu aaday meesha la isku taraarixiyo, James ayaa ka daba tagay wuxuuna darbeeyay Rodney markii uu ka soo dagtay meesha la isku taraarixiyo.	
Dhowrki toddobaad ee la soo dhaafay, carruurta waawayn ee ku jirta daryeelkaada waxay isu bixiyeen naanayso. Naanaysta Diego waa Qubo. Markii hore, waxay kula ahayd mid aan dhib lahayn, laakiin waxaad garowsatay in carruurta ay ugu yeeraan magacaas marka uu wax u qabto si ka yar sida ay wax u qabtaan.	
Maalin kasta, Elena waxay rabtaa inay la ciyaarto Jose iyo Jasmine. Mararka qaarkood waxay Elena u sheegaan inay iska baxdo. Mararka qaar waxay u sheegaan inay la ciyaari karto, laakiin iyagu ay yihiin hooyada iyo aabaha, iyaduna tahay ilmo. Ilmuhu ma hadlaan, waana in Elena ay raacdo dhammaan awaamiirtooda.	
Dhowrki maalmood ee la soo dhaafay Robert ayaa Mateo kula orotamay kursi wuuna kaga hor fadhiistay. Markii Mateo uu yimid kursigi, Robert wuxuu kursigi ka hoos bixiyay Mateo isagoo ku fadhiisan rabo, taasoo keentay in Mateo uu ku dhaco dhulka.	
Samira iyo Brooke waxay bas iskula raaceen goobta daryeelka carruurta. Samira waxay sawir ka qaaday Brooke oo ku dhex hurdayso baska waxayna tustay qof kasta waxayna u sheegtay qof kasta in Brooke ay tahay ilmo maadaama ay dhex seexatay baska.	